# Macluumaad ku saabsan iskaashiga ku aaddan Diiwaanka Qaranka ee Tayada ee Maskaxdhiigga Waddanka

Waaxdan caafimaadka waxaan macluumaadka ku aaddan bukaannada uu haleelay maskaxdhiiggu ama TIA kula qornaa diiwaanka tayada ee qaranka ee Maskaxdhiigga Waddanka. Ulajeeddada laga leeyahay diiwaanku waa in la xoojiyo daryeelka maskaxdhiigga ee dadka oo dhan, iyadoon la egeyn aagga uu qofku degganyahay, jinsiga uu yahay iyo da'da. Si loo helo macluumaad lagu kalsoonaan karo waxaa muhiim ah in inta uga badan kuwa uu maskaxdhiiggu ku dhacyo iyo TIA ay diiwaanka ku jiraan. Macluumaad lagu kalsoonaan karo wuxuu kor u qaadayaa fursadaha ku aaddan hagaajinta duruufaha dadka uu ku dhacyo maskaxdhiiggu ama TIA iyo xigtadooda intaba.

## Maxay yihiin macluumaadka la diiwaan gelinayo

Waxaa macluumaadka laga ururinayaa shaqaalaha caafimaadka iyo bukaannada. Waxaa intaas dheer in qeyb macluumaadka ka mid ah laga soo qaadanayo faylka caafimaadka ee bukaanka, diiwaanka dadweynaha iyo diiwaanno kale.

**Maskaxdhiig** Inta lagu jiro waqtiga daryeelka ee markaas taagan waxaa la diiwaan gelinayaa nambarrada aqoonsiga, jinsiga, qaabka deegaanka iyo awooddi hawlqabashada ee ka horreysay inti uusan maskax dhiiggu qofka ku dhicin. Waxaa kaloo la diiwaan gelinayaa dawo ku daweynta, waxyaabaha khatarta keena, dhibaatooyinka ka dhasha cudurka, qiimeynta koox ahaaneed iyo baaritaannada. Seddax bil ka dib marka uu cudurku qofka ku dhacyo waxaa la sameynayaa dib u eegis, halkaas oo laguugula soo xiriirayo warqad ama khadka taleefanka. Su'aalihi hore waxaa markaas dib loogu eegayaa iyadoo la kaashanayo su'aalo foom ku qoran. Waxaad sidoo kale markaas heleysaa fursad aad aragti uga dhiiban kartid daryeelka lagu siiyo. Ra'yi baaris taas la mid ah waxaa la sameynayaa hal sano ka dib marki uu qofku xanuunsaday. Waxaad markaas fursad u heleysaa in aad aragti ka dhiibatid dadaalladi taageero ahaan ay degmadu kuu gelisay.

**TIA** Inta lagu jiro waqtiga daryeelka degdegga ah waxaa la diiwaan gelinayaa nambarradaada aqoonsiga, jinsiga. Waxaa kaloo la diiwaan gelinayaa dawo ku daweynta, waxyaabaha khatarta keena, dhibaatooyinka ka dhasha cudurka, qiimeynta koox ahaaneed iyo baaritaannada.

Gobalka Västerbotten ayaa leh mas'uuliyadda guud ee sharci ahaaneed ee macluumaadka shakhsiga ah ee Maskaxdhiigga Qaranka. Qofka leh mas'uuliyadda guud waxaa loogu yeeraa mas'uulka dhexe ee macluumaadka shakhsiga ah. Waaxdan caafimaadku waxay leedahay mas'uuliyad maxalli ah oo sharci ahaaneed oo ay macluumaad ku ururiso.

## Macluumaadka xiriirka

Marka macluumaad kugu saabsan ay ku jiraan diiwaan tayo waxaad leedahay xuquuq go'an. Wax dheeraad ah oo kuwaas ku aaddan ka akhriso hoos. Ma rabtaa in aad Maskaxdhiigga Waddanka kala xiriirtid xuquuqdaada, adeegso macluumaadkan xiriirka:

Riksstroke, Målpunkt PA rum 1013, Norrlands Universitetssjukhus, 901 85 Umeå

Tfn 0907858783, cinwaan E-mail riksstroke@regionvasterbotten.se, Bog intarneet http://www.riksstroke.org/

Macluumaadka xiriirka waaxda daryeelka

……………………………………………………………………………………………….

(qofka xiriirka, magaca waaxda daryeelka, isbitaalka, maamul gobaleedka/gobalka)

Wakiilka ilaalinta macluumaadka ayaad sidoo kale kala xiriiri kartaa su'aalaha ku saabsan macluumaadka kugu saabsan ee ku jira diiwaanka tayada. Wakiilka ilaalinta macluumaadku wuxuu kor ka ilaalinayaa sida loogu dhaqmayo xeerarka khuseeya maareynta macluumaadka shakhsiga ah. Haddii aad rabtid in aad wax dheeraad ah ka ogaatid cidda waaxdan daryeelka ka ah wakiilka ilaalinta macluumaadka la xiriir shaqaalaha kor ku xusan.

Wakiilka ilaalinta macluumaadku wuxuu hey'adda dowladda mas'uul dhexo uga yahay macluumaadka shakhsiga ah. Guddiga gobalka ee gobalka Västerbotten, Norrlands Universitetssjukhus, 90185 Umeå, cinwaan E-mail dataskyddsombud@regionvasterbotten.se

## Waxaad gacan ka geysaneysaa xannaano sii hagaajinta

In aad wax uga jirtid diiwaanka tayada waxaad gacan uga geysaneysaa xannaano sii hagaagta. Maaha khasab in laga qeyb qaato, taasina ma saameyneyso daryeelka aad heleysid. Macluumaadka waxaa loo adeegsanayaa si leesu barbar dhigo daryeelka waaxaha daryeelka iyo daryeel bixiyayaasha waddanka oo dhan. Natiijada waxaa loo isticmaali karaa shaqada wax sii hagaajinta iyo cilmi baarista. Diiwaanka tayadu wuxuu gacan ka geysanayaa in la helo aqoon cusub oo ku aaddan daweynta ugu fiican, mar kasta oo ay bukaannada ku jira bataanne waxaa sii sugnaaneysa natiijada.

## Taageerada xagga sharciga

Dhammaan kuwa maareynaya macluumaadka shakhsiga ah waa in ay taas sharci u heystaan. Ku maareynta macluumaadka shakhsiga ah ee diiwaanka tayada waxaa nidaaminaya xeerka ilaalinta macluumaadka, GDPR, iyo fasalka toddobaad ee xeerka bukaannada, PDL. Waa la oggolyahay in macluumaad lagu qoro diiwaanka tayada maxaa yeelay macluumaadku bulshada ayey guud ahaan dan u yihiin, muhiim ayeyna laamaha caafimaadka u yihiin. Shaqaalaha macluumaadka qof ahaaneed ku maareynaya diiwaanka tayada waxaa qabanaya xeerka waajibka sir qarinta.

## Sidaas ayaa loo isticmaalayaa macluumaadka kugu saabsan

Macluumaadkaaga ku jira diiwaanka tayada waxaa loo isticmaali karaa oo keliya in la

horumariyo oo la hubiyo tayada daryeelka, la soo bandhigo tirakoob isla markaana dhinaca cilmi-baarista dhanka daryeelka caafimaadka iyo bukaanka. Macluumaadka waxaa xitaa ka dib baaritaanka waajibka xog qarinta shaqada loo gudbin karaa ciddii macluumaadka u isticmaalaysa mid ka mid ah saddexdan ujeeddo. Haddii macluumaadka la bixin karo waxay taasi ku dhaceysaa si elekteroonig ah.

### Qarsoodi

Macluumaadka kugu saabsan ee ku jira diiwaanka tayada waxaa ay hoos imanayaan qarsoodiga daryeelka caafimaadka iyo bukaanka ee dhinaca sharciga guud ee xog qarinta. Waxay taasi guud ahaan ka dhigantahay in macluumaadka kugu saabsan uu diiwaanka tayadu gudbin karyo oo keliya haddii ay si cad u muuqato in aysan adiga ama qof xigtadaada ah dhibaato ka soo gaareyn haddii macluumaadka la bixiyo.

### Sidaas ayaa loo isticmaalayaa macluumaadka kugu saabsan

Macluumaadkaaga ku jira diiwaanka tayada waxaa loo isticmaali karaa oo keliya in la horumariyo oo la hubiyo tayada daryeelka, la soo bandhigo tirakoob, cilmi-baarista dhanka daryeelka caafimaadka iyo bukaanka isla markaasna dhinaca cilmi-baarista caafimaad. Macluumaadkaas, waxaa xitaa ka dib marka la hubiyo xog-qarinta sirta, la oggolyahay in loo gudbiyo qof u isticmaali doonaa mid ka mid ah afartaas ujeeddo. Haddii macluumaadka la oggolyahay in la bixiyo waxay taas u dhacaysaa qaab elaktaroonig ah.

### Amaanka

Macluumaadka kugu saabsan ee diiwaanka tayada waa laga ilaalinayaa in ay hesho cid aan ehel u ahayn. Cidda baahida u qabta macluumaadka si ay shaqadeeda u fushato oo keliya ayaa macluumaadka loo gudbinayaa. Waa la hubinayaa in cid aan ehel u ahayn aysan macluumaadka helin, waxa loogu yeero dib u eegista diiwaanka. Macluumaadka waxaa la ilaalinayaa iyagoo la maldahayo. Gelitaanka diiwaanka si macluumaad looga helo wuxuu u dhacayaa si aamin ah.

### Helitaanka

Shaqaale ehel u ah oo ka shaqeeya waaxda daryeelka ee macluumaadka gelisay diiwaanka tayada ayaa gaar ahaan macluumaadkaas u geli kara. Ma jiryo daryeel bixiye kale oo macluumaadkaas u geli kara. Shaqaalaha ehelka u ah ee ka shaqeeya diiwaanka tayada waa ay u geli karaan dhammaan macluumaadka diiwaanka ku jira.

### Inta waxa la kaydinayo iyo burburinta

Macluumaadka kugu saabsan waa la tuuraa marka aanay sii jirin baahi ah in la horumariyo oo la hubiyo tayada daryeelka.

RIKSSTROKE
The Swedish Stroke Register

**Xuquuqdaada**

- Waxaad xaq u leedahay in lagaa daayo in macluumaadka kugu saabsan lagu qoro diiwaanka tayada.
- Waxaad xaq u leedahay in goor kasta oo ay noqotaba macluumaadka kugu saabsan laga tirtiro diiwaanka tayada.
- Waxaad xaq u leedahay in aad ogaatid macluumaadka ku khuseeya ee ku jira diiwaanka tayada iyo haddey sidaas tahay in si lacag la'aan ah aad koobi uga heshid macluumaadkaas, waxa loogu yeero qoraal diiwaanka laga soo saaray. Waxaad xaq u leedahay in aad macluumaadka ku heshid si elekteroonig ah.
- Waxaad xaq u leedahay in la saxo macluumaadki khaldan ee adiga kugu saabsan. Waxaad xaq u leedahay in macluumaadka aan dhammeystirneyn la dhammeystiro.
- Duruufaha qaarkood waxaad xaq u leedahay in aad dalbatid in la xaddido maareyn macluumaadka shakhsiga ah ee adiga kugu saabsan. Waxay taasi shaqeyneysaa inta la qiimeynayo waxyaabaha kale ee la diiddanyahay. Xaddidaaddu waxay ka dhigantahay in diiwaanka tayadu uusan macluumaadka kugu saabsan ka sameyn karin wax ka badan in uu sii keydiyo oo keliya.
- Waxaad xaq u leedahay in aad macluumaad ka heshid waaxaha daryeelka ee helay macluumaadka kugu saabsan iyo goorta ay heleen, waxa loogu yeero qoraal laga soo saaray diiwaanka.
- Waxaad xaq u leedahay magdhaw haddii macluumaadka kugu saabsan loo maareeyo si ka soo horjeedda xeerka ilaalinta macluumaadka ama xeerka bukaannada.
- Waxaad xaq u leedahay in aad dacwad u gudbisid hey'adda ilaalinta xogta hoose ee qofka oo ah hey'adda korjoogteynta ee aaggan